*suuqa  xorta ah.*

D. *Qiimo-weynidda nolosha  qofka  co  la  imanaysa sugidda x.uquuqda aasaasiga iyo xorriyadaha qofka.*

E. *Nabadgelyo iyo habsami kula dhaqanka dawladaha gobolka ivo adduunweynaha.*

*IYADOO UU SI FIICAN U DHUUXAY: Laf iyo ludba araarta iyo mucda Dastuurka:*

***Shacbiga Somaliland,  waxa uu ha1kan ku  oggolaaday maanta oo taariikhdu tahay   /    /  , isagoo addunweynaha halkan ugu caddaynaya inuu Dastuurkan ka dhigtay Dastuurkiisa Qaran.***

caalamiga ah iyo gobolada adduunka.
10- Bixinta Astaamaha xurmo iyo sharaf ee ay ka mid ka yihiin Biladaha .
11- Caddaynta xaalad dagaal ; isla markaana ku dhawaaqidda xaalad degdeg ah.
12- Fulinta xeerarka aan waaxda garsoorka awoodaheeda hoos iman iyo ;
13- Awoodaha kale ee ku xusan Dastuurka iyo xeerarka kale.

***QODOBKA 116AAD***
AWOODAHA MADAXWEYNE-KU-XIGEENKA

Madaxweyne-ku-xigeenka Qaranku waxa uu awood u leeyahay;

1-Ku-simidda xilka Madaxweynaha marka uu Madaxweynuhu maqan yahay ama uu buko.

2- Gudashada hawlaha uu Madaxweynuhu u egmado.

3- Qabashada xilka Madaxweynenimo marka ay jagadu banaanaato sababahan darteed;

b- Is-casilaad (xlika-tagid) Madaxweynaha;

t Xukun dambi ah oo xilka lagaga xayuubiyey;

j- Marka uu hawsha loo doortay u gudan kari waayey caafimaad-darro darteed iyo;

x- Geeri ku timaada.

***QODOBKA 117AAD***
AWOODAHA KALE EE MADAXWEYNE EE LA XIDHIIDHA XEERARKA DEGDEGA AH

1-Marka ay soo ifbaxaan xaalado gaar ah oo halis gelin kara nabadgelyada dalka; khatar ku noqon kara xeerka iyo nidaamka; khalkhal ku abuuri kara xasiloonida guud ama kalsoonida dhaqaale, iyada oo aan golaha wakiiladu fadhi lahayn ama haddiiba uu fadhiyo, aanu awoodi karayn qaadashada go’aan gaadhis degdeg ah sida ay ugu muuqato Madaxweynaha inay ku haboon tahay; waxaa Madaxweynuhu soo saarayaa xeerar degdeg ah, oo loogu talo galay in lagu joojiyo khataraha kor ku sheegggan.

Waxaa waajib ah in muddo aan ka badnayn todoba (7) maalmood ay ku oggolaadaan 2da guddi joogto xeerarka deg-deg ah. Haddiiba ay guddiyadu diidaan, waxaa loo bandhigi doonaa labada gole oo wada jir u fadhiista muddo aan ka badnayn (45) maalmood gudahood marka ay guddiyadu diideen; waxaana ay ku oggolaan karaan cod haldheeri ah oo gacan taag ah (Simple majority).

2- Xeerarka degdega ahi waxa ay yeelan doonaan awoodda xeerarka ka soo baxa golaha wakiilada iyo golaha guurtida oo kale waxa ayna dhaqan gelayaan marka uu saxeexo Madaxweynuhu.

3- Waxa xeerarka degdegga ah dib-u-eegidda ay 2da gole ku samayn doonaan 6dii bilaadba hal mar, iyaga oo go’aankoodu ku salaysnaan doono cod hal ka dheeriga ah (Simple Majority).

***QODOBKA 118AAD***
HAB-MAAMUUSKA MADAXDA SARE

1- Madaxweynaha iyo ku-xigeenkiisa ayaa leh hab-maamuuska koowaad ee Qaranka.

2- Guddoomiyaha golaha guurtida ayaa leh hab-maamuuska ku xiga.

3- Guddoomiyaha golaha wakiilada ayaa leh hab-maamuuska saddexaad ee Qaranka.

**XUBINTA 3AAD**

***QODOBKA 119AAD***
GOLAHA WASIIRADA

